WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD. 2019

# AF SOOMAALI

2019

XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

SomExams

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE
XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

SOM EXAMS

Code Number

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD, 2019
AMIN 2 SAAC IYO 10 DAQIIQO AKHRIS AH

# AF-SOOMAALI

**TILMAAMAHA IMTIXAANKA**

- Waxaa imtixaanku ka kooban yahay 7 bog
- Tiri bogagga, hadday wax ka maqan yihiin u sheeg ilaaliyaha imtixaanka
- Haku qorin magacaaga iyo Roll lambarkaaga toona warqadda imtixaanka
- Hubi in waraaqda lifaaqu ku dhegen tahay imtixaanka, hadday kaa maqan tahay u sheeg ilaaliyaha imtixaanka.
- Lama ogola waraaqo dheeraad ah
- Jawaabtu hadday kaa qaldanto isku tallaab saar, kadibna qor tan saxda ah.

**Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay:**

| QAYBTA | DHIBCAHA | QAYBTA | DHIBCAHA |
|---|---|---|---|
| Qaybta 1aad | 25 dhibcood | Qaybta 5aad | 10 dhibcood |
| Qaybta 2aad | 30 dhibcood | Qaybta 6aad | 10 dhibcood |
| Qaybta 3aad | 10 dhibcood | | |
| Qaybta 4aad | 15 dhibcood | | |
| | | | **Wadarta: 100 Dhibcood** |

**Waxaa iska leh saxaha**

| QAYBAHA | DHIBCO | QAYBAHA | DHIBCO |
|---|---|---|---|
| QAYBTA 1AAD | | QAYBTA 5AAD | |
| QAYBTA 2AAD | | QAYBTA 6AAD | |
| QAYBTA 3AAD | | | |
| QAYBTA 4AAD | | | |
| WADAR | | | % |


• www.somexams.com ✻ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS

**Akhri sheekadan kana war celi su'aalaha ka dambeeya**

## Duco Waalid


Awlaada illahay baa kala fadiley mid waa **caasi** ama **caaq** midna waa **baarri** aad jeclaaneyso markaad aragto **camaladiisa** wanaagsan, Alle ka **cabsigiisa** iyo **addeecida** waalidkiisa. Arrintaasi waxay saameyn ku yeelataa **nolosha adduun iyo aakhiro ee mustaqbalka ilamaha**.Haddaba hooyadu waxay **saddex jibaar** ka xaq iyo xuqquuq badan tahay aabbaha sida diinteenu inoo sheegtey, waliba marka ay agoon kugu koriso ama aabbe la'aan waa ka xaq badan tahay illen booskii aabbaha iyo kii hooyadaba wey buuxiseye. Bal ila eeg sheegan wiilkii taajirka ahaa: **Nin taajir** ah ayaa la **tartamey asxaabtiisa** una sheegey in aanu weligii ku khasaarin ganacsiggiisa **xataa mar keliya!!,** waxay weydiiyeen magaalada hebla weligaa timir ma u iib geysey ? maya ayuu yiri.Waxay ku xujeeyeen inuu Taajirku timir u rarro magaalo qani ku ahayd timirta.



Taajirkii **saddex rati** ayuu timir ka buuxiyey una iib geeyey magaaladii, laakiin waxuu kula kulmey magaaladii bannaankeeda oo dad badani tuunsan yihiin, "Maxaa idinka soo saarey magaaladda" ayuu taajirkii weydiiyey? waxay ku jawaabeen 'Boqorka magaaladda ayaa gabadhiisa waxaa ka lumey silsilad **Dabah** ah, aad ayey u ooydey waxaanu balan qaadey in ninkii hela silsiladaas loo guurin doono gabadhaas aad uga qaracantey lumida siliskeedda .

Taajirkii ayey weydiiyeen maxaad wadaa? **(Haa timir beec ah buu yiri"),** keen waan kaa gadaneynaa baahi badan ayaa na haysee qiimahaad rabto nagagga iibi fadlan ayey dhaheen, Waxuu ku helay qiimo aad u wanaagsan oo faa iiddo badan leh, Balse waxaa maqlay **boqorkii in nin taajir ahi timir ka helay faa'iiddo** badan magaaladan oo timirtu aad ugu badneyd raqiisna ahayd.

Boqorkii baa yiri ha la iigu yeero ninkaas, kuna yiri **((Ma run baa in aad timir kaga faa'iidey magaaladan')**), Haa waa run markaan la kulmey dhalinyaro badan oo dhulka faagaya sidaanoo kale intuu gacanta ciidda galiyey balse waxaa gacantii soo raacey silsiladdii la raadinayey,"***haa waaba tan silsiladii gabadhaada*** Taajirkii baa yiri' ' Boqorkii ayaa yaabey oo farxey yirina: **waxaad tahay nin nasiib badan waxaan kuu hibeeyey gabadheyda** madaama aad heshey siliskeedii.Waxaan ku weydiiyey iiga sheekee xaaladaadda naf ahaaneed Taajirkii baa yiri: Waxaan ahaa wiil yar oo **agoon** ah waxaan **jeclaa hooyadey oo i xanaaneyn jirtey,** Markey dhimaneysay ayey iigu duceysey**("illahay adduunka kuguma khasaariyo**, ***Guri boqorna alle ha kaaga guuriyo***, **Ciiddana dahab ha kaaga dhigo")** Tani waa fadligii ducadii hooyadey Sheekadan waxaa laga fahmayaa in ilmahii duceysan aanu adduun iyo aakhiro midna ku khasaarin waxii loogu duceeyana. helayo,dhammaanteen aan u baarri falno waalidkeen.





©PNEB,2019

• www.somexams.com ✻ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com

**QAYBTA 1AAD:** **(25 DHIBCOOD)**

**B. Ka fal warcelin su'aalahan hoos ku qoran: 20 dhibcood**

1. Maxaa saameyn ku yeesha nolosha ilamaha addun iyo aakhiraba?

……………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………

2. Sheeg astaamaha ilmaha baarriga ah?

……………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………

3. Maxaa sababey in hooyadu ka Xuqquuq badato aabbaha xaggeese lagu sheegey?

……………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………

4. Wiilka taajirka noqdey markuu yaraa maxuu ahaa?

……………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………

5. Gaadiidka uu timirta ku rartey maxay ahaayeen?

……………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………

6. Maxaa dadka ka soo saarey magaalada oo ay doonayeen?

……………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………

7. Boqorku markuu u yeerey taajirka maxuu weydiiyey?

……………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………

8. Guusha nolosha taajirka xaggee salka ku haysaa?

……………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………

9. Markii taajirku helay siliskii gabadha boqorku maxuu yiri?

……………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………

10. Maxay tahay dulucda faaiidadda sheekadan

……………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………



©PNEB,2019

SOM EXAMS

• www.somexams.com ✻ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS

**T. Astooyinkan soo socda ka geli weedha meesha ay kaga haboonyihiin 5 *dhibcood***

( - ? . !! ' )

Eeg Tusaalahan: Kani ma ardaybaa**?**

1. Wiilku waxuu ahaa aabbe la aan
2. Marun baa in aad timir ka faa'iidey
3. Hayaay caasiga eega
4. Waxuu ku helay qiimo aad u wanaagsan
5. Illahay guri boqor ha kaaga guuriyo – ciidana Dahab ha kaaga dhigo

**QAYBTA 2AAD: NAXWE** **(30 DHIBCOOD)**

**B. ku buuxi meelaha bannaan ereyo ku habboon** **(10 dhibcood)**

1. Xuruufta farta soomaligu tiradooddu waa ………………………………
2. Shibanayaasha far soomaaliga tiradooddu waa ………………..shibane
3. Shaqalada gaa-gaaban ee far-soomaaliga tiradooddu waa …… …….. ……. ………
4. Shibanayaasha far-soomaaliga ee labanlaabma waa 7 shibane waxayna kala yihiin:

a.…………………………. f.…………………………
b.…………………………. g.…………………………. 
c.………………………… h.…………………………..
d.…………………………


©PNEB,2019

• www.somexams.com ⁕ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS

**T. Ku aadi Qaybta (B) ereyga ku haboon ee qaybta (T)** **10 dhibcood**

| | Qaybta (B) | | Qaybta (T) | |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Cosob | | Labka fardaha | b. |
| 2. | Tacadi | | Nuugis | t. |
| 3. | Jees | | Goray | j. |
| 4. | Ramag | | Ramaas | x. |
| 5. | Ari | | Cayayaan | kh. |
| 6. | Ayax | | Waddo | d. |
| 7. | Hilin | | Geel dhalay | r. |
| 8. | Haldhaa | | Qoys | s. |
| 9. | Jaqid | | dhib badan | sh. |
| 10. | Sange | | Riyo iyo Ido | dh. |

**J. Macnee ereyadan soo socda:** **(5 dhibcood)**

| | | |
|---|---|---|
| 1 | Aqal | b. |
| 2 | Gudcur | t. |
| 3 | Aroor | j. |
| 4 | inkaar | x. |
| 5 | Ubad | Kh. |

**X. Sheeg lidka ereyadan hoos ku qoran** **(5 dhibcood)**

| | |
|---|---|
| 1. Colaad | b) |
| 2. Caddaan | t) |
| 3. Farxad | j) |
| 4. Aftahan | x) |
| 5. Macaan | kh) |



©PNEB,2019

• www.somexams.com ⁕ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS

**QAYBTA 3AAD:** **(10 DHIBCOOD.)**

**B. Ereyadan googaalaysiga ah iyo jawaabohooda isku aadi**

| Dabaysha | sonkorta | carrabka | Majinta | adhiga | afka | geesaha riyaha |
|---|---|---|---|---|---|---|

1. Adhigayaga xeradiisu waa wada ul oo ul laqaato maleh……………………………
2. Wax so' leh oo sar leh ,oo suun leh,oo seed leh,oo sanuun leh, aan nin sooryo u deeqin……………………………………………………………………………………….
3. Silsilad qubatay sidee loo guraa……………………………………………………….
4. Aqal wada aleelaysan……………………………………………………………………
5. Wax cirka tiir ku leh ,dhulka taag ku leh,tagoogo orgi leh,dhulka tibixsada……..........
……………………………………………………………………………………………………

**QAYBTA 4AAD: SUUGAAN** **(15 DHIBCOOD)**

**B. Gabaygan akhri dabadeedna ka jawaab su,aalaha ka dameeya (10 dhibcood)**

**1.** Hadduu geed engego xaabadaa, lagu idlaystaaye
**2.** Mid yar oo iniintiis ah baa, soo awaal baxa,e
**3.** Isagaa anfaaciga hadhkiyo, oodda kaafiya,e
**4.** Dadkana odaygu goortuu ka baxo iyo islaantiisu
**5.** Ubadkooda hadha baa tabcoo, ayatiin hela,e
**6.** Markii aadan iyo xaawo iyo kaynta ,la abuuray
**7.** sidaasey arwaaxdiyo dhirtuba ku isirraayeene
**8.** Ummadaan shabaabkeedu hanan waw ayaan xumo,e
**9.** Inamiyo hablaba waxaa tihiin, aaran soo kacaye
**10.** Itaalgabe dadkiinii horoo weydin aragtaane
**11.** Idinkaa ammaanada xilkii eeggan qaabiliye.

1. Beydadka Gabaygan kuma ayaa ku cajabiyey?
……………………………………………………………………………………………………
2. Waa maxay ujeedadda gabyaagu u tiriyey gabaygan
……………………………………………………………………………………………………
3. Muxuu gabyaagu dhalinyarada kula dar-daarmay ?
……………………………………………………………………………………………………
4. Muxuu gabyaagu ula jeedaa inamiyo hablaba waxaa tihiin aaran soo kacaye? .
……………………………………………………………………………………………………
5. Maxuu ula jeedaa gabayaagu geed engegey?
……………………………………………………………………………………………………


©PNEB,2019

• www.somexams.com ⁕ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS

**T. Ereyadan ku jira gabayga sharrax kooban ka bixi (5dhibcood)**

1. Engag b) ……………………………………………………………………………………
2. Anfaaci t) ……………………………………………………………………………………
3. Itaalgabe j) ……………………………………………………………………………………
4. Aaran x) ……………………………………………………………………………………
5. Oodda kh)……………………………………………………………………………………

**QAYBTA: 5AAD MAAHMAAHYO** **10 DHIBCOOD**

**Sheeg macnaha dahsoon ee ku jira maahmaayadan soo socda**

1. Labo qaawani isma qaaddo……………………………………………………………………
2. Habeen iyo maalini kala mudan…………………………………………………………………
3. Xaglo laaban xoolo ku yimaadaan. ………………………………………………………………
   ……………………………………………………………………………………………………
4. Nimaan dhididini ma dhergo………………………………………………………………………
   ……………………………………………………………………………………………………
5. Waad baahan tahay bakhtiga looma cuno……………………………………………………
   ……………………………………………………………………………………………………


©PNEB,2019

• www.somexams.com ⁕ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS


**QAYBTA 6 AAD:** **(10 DHIBCOOD)**

**Labadan mawduuc mid ka dooro, kana qor Curis ka kooban 15 sadar.**

1. **Faa'iidooyinka xoolaha nooli inoo leeyihiin**
2. **Jarida iyo gubida dhirta maxay sababtaa?**

Adiga oo ka fekeraya xiriirka labada mowduuc ay wadaagaan.

Astooyinka qoraalka sida joogsiga ,hakadka, calaamad su'aaleedka, iyo Qurxinta farta.





Dhammaad.



©PNEB,2019

• www.somexams.com ⁕ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com